


Cutubka 3aad: Diyaarinta Cilmibaarayaasha:

Si aan u helno documenti lagu hago howsha, waxaan degsanay Qorshe howleedka sanadka 2014 inta ka dhiman waana kan sawirkiisa.



Buugga Qorshe- Howleedkii Hey'adda ee 2014 tii

Sida aan ku soo xusnay Cut laad, waajibka weyn ee Hey'adda waa inay siiso dowladda talo ay go'aan ku qaadan karto, hadaba si loo helo Cilmibaarayaal ahal u ah inay siiyaan dowladda talo Cilmiyeyaan, waxaa lagama maarmaan noqotay in la diyaariyo Cilmibaarayaasha (kor loo qaado aqoontooda) ha ahaato mid guud, mid takhasus iyo mid ku saabsan qaabka Cilmiga loo baaro. Si loo fuliyo qorshahaan waxaan go'aansannay qodobadaan:-

Qodobka koowaad: Casharo Joogta ah:

Waxay bixinayaan isla Cilmibaarayaasha casharro ayadoo loo eegaayo nuuca casharka iyo takhasuska taasoo keeneysa in ruuxa casharka bixiinaaya inuu soo aqriyo kutubo maraajic ah si uu u diyaariyo cashar nuxur leh, taasoo qeyb ka ah dhisida aqoonta cashar bixiyaha naftiisa.

Sidaas awgeed cilmibaarayaasha waxay u qeyb sameen mid cashar soo diyaariya iyo mid dhageysta, arrintaan wax weyn ayey ka tartay aqoonta Kaadarka Hey'adda.

Casharadaan waxaa la qaataa sida caadada ah laba jeer todobaadkii. Sida ku cad qorsha howleedka sanadka ee HCBS.



ADM. Faarax oo sharaxaya casharada joogtada ah ee todobaadlaha ah.



Kaadarka HCBS oo ka faa'ideysanaya casharada joogtada ah ee todobaadlaha ah.



Ag.Waaxda Culunta Badda Eng Cabaas oo sharaxaya cashar ka mid ah casharada joogtada ah.

Qodobka labaad: Aqoonisweydaarsi gudaha hey'adda hal jeer bisihii

Aqoonisweydaarsigaan sida badan waxaa bixiya madaxda hey'adda iyo aqoonyahanno dibadda laga keenay (hase yeeshee ka qeybgalayaashu waxaa laga doonayaa inay dood la galaan cashar bixiyaha iyo mid dhexdooda ah oo ku saabsan mowduuca laga hadlayo.



Kaadarka HCBS oo ka qeybgalaaya aqoonisweydaarsiga billaha ah

Qodobka Sedexaad: Aqoonisweydaarsiga Guud: oo loogu yeero aqoonyahannada wasaaradaha, Jaamacadaha, mas'uuliyiinta dowladda iyo martisharaf kale (sanadkii 4jeer).

Nuucan aqoonisweydaarsiga ah waa mid aad muhiim u ah oo lagu soo bandhiggo cilmibaaris ay sameysay HCBS ama lagu soo bandhiggo warbixin caalami ah oo taabaneysa danaheenna badeed iyo kheyraadkeenna.



Admiral Faarax iyo allaha u naxariisto Xil. Xeyd iyo MD Sandheere oo ka qeybgalaya aqoonisweydaarsiga guud



Qaar ka mid ah Xildhibaanada barlamaanka oo ka qeybgalaya aqoonisweydaarsiga



Capt. Mooge oo ka hadlaya aqoonisweydaarsiga guud.



Sawir guud oo ah ka qeyb galayaasha aqoonisweydaarsiga ee lagu qabtay xarunta HCBS.


Qodobka afaraad: ka qeyb galka hey'adda ee tababarada ay bixiyaan hey'adaha caalamiga ah:

Tababarada nuucaan ah waxaan ku saleynaa cilmibaaraha ka qeyb galaaya inuu ahaado Jaamici takhasus u leh mowduuca tababarka.

Tababaradaan aqoonyahanada hey'addu ay ka qeyb galeen waa 27 tababar iyo shir, waxaad ku arki doontaan qeyb ka mid ah sawirada hoos ka muuqda.

Runtii tababaradaan wax weyn ayaan ka soo faa'ideysanay, ha ahaato xaga Culuunta badda, Qawaaniinta badda, deegaan badeedka, dhaqaalaha badda, nabadgelyada badda iwm.

Sidoo kale waxaan ka helnay documents aad u qiima badan oo ku saabsan culuunta aan kor ku soo xusnay.



MOMBASA 27-29/04/2015

- Midig: 1) Md Xuseen Cali Axmad Ilatiyaha Wasaarada Kalluumeysiga
2) Wasiirka Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda Maxamed Cumar Ceeymooy
3) ADM. Faarax Axmed Cumar Guddoomiyaha HCBS.
4) Aqoonyahan Soomaali ah oo deggan Kenya.

Mowduuca
Tababarka:

Dib u eegista Maamulka Badaha Soomaaliya, Mombasa – Kenya.



Eng. Cabaas HCSB midig koowaad iyo wasiir ku xig wasarada howlaha guud bidix koowaad oo ka qeyb galaya tababarka Isbedelka Cimilada: Addis Ababa – Etoobiya.



**EU CRIMARIO PROJECT
@ WHITESANDS HOTEL MOMBASA 9th -10th DEC 2015**

Ag. Waaxda Qaanuunka Cabdiraxiim Warsame & s/Guuto Axmed Sh. (Ia Taliye) oo taagan Bartamaha safka labaad oo ka qeyb galaya tababarka Nabadgelyada Badaha oo lagu qabtay Mombasa - Kenya



Ag. Waaxda Dhaqaalaha Sectoroka badda Axmed Bashiir (gadal dhexbartanka) oo ka qeyb galay tababar ay bixineysay IMO. Nairobi - Kenya



Genral Axmed Sh. Lataliyaha HCBS, Ag. Waaxda Qaanuunka Badda Cabdiraxiim Warsame iyo Ag. Waaxda Qorsheynta Saciid Xasan (dhexbartanka safka hore) oo ka qeyb galaya shir looga hadlayay Nabadgelyada Badaha oo ka dhacay Tananariv – Madagasgar 22-44/09/2015



Ag.Waaxda Bii'ada badda Mustaf Xasan Nuur iyo Xasan Max'ed (dhexbartanka safka) oo ka tirsan isla waaxda oo ka qeybgalaya tababar ku saabsanaa la qabsiga Isbadalaka Cimilada oo lagu qabtay Nairobi-Kenya.



Ag.Waaxda Bii'ada badda Mustafa Xasan Nuur oo ka gudoomaya shahaado Madaxa UNDP ee Soomaaliya.